# Al-ictisaam Midabo baddana!!!

Qaybtii 1-aad

Mahad oo idil waxay u sugnaatay Allah s.w nabadgelyo iyo naxariisna korkiisa ha ahaato nabigeena suuban Muxammad ibnu Cabdillah S.C.W, eheladiisii, saxaabadi iyo inta xaqa ku raacday   ilaa maalinta qiyaame.

Intaas kadib

Waxan halkan idiinku soo gudbinayaa maqaal aan ugu magac daray (Al ictisaam midabo baddana)   si aan walalaaha xaqa jecel ugu soo gudbiyo intii aan la joogay Al-ictisaam ha ahaato masjid ama meel fagaare ah ama muxaadarooyin intaba.

Waxanse ka afeefanaya in qoraaladan taxanaha ah aan ugu talo galay inta wax badan ka fahmaysa arimahan maanta la isku haysto ee ka dhextaagan culimada dhexdooda ee ku saabsan   arimaha Soomaaliya, si loo ogaado yaa xaq ku taagan yaase lumay oo ka leexday jidkii ama   dariiqii la isku ogaa.

Marka hore muxuu yahay isabdalka ama diinta oo marba midab loo yeelo? Waxa arintaas ka jawaabaya Abuu Xayaan Raximahullah waxa uuna yiri

وقال أبو حيان رحمه الله: اللون: معروف، وجمعه على القياس ألوان. واللون: النوع، ومنه ألوان الطعام: أنواعه. وقالوا: فلان متلوّن: إذا كان لا يثبت على خلق واحد وحال واحد، ومنه: يتلوّن تلوّن الحرباء، وذلك  أن الحرباء، لصفاء جسمها، أيّ لون قابلته ظهر عليها، فتنقلب من لون إلى لون. اهـ ("تفسير البحر المحيط" /تفسير سورة البقرة: 69/مكتبة ابن تيمية)

Hadaba waxa aynu ka hadlayno waa midabada kala duwan ee loo yeelayo diinteena sharafta badan ee aan lahayd nuqsaan, iyo xumaan toonaba, waana arinta ay Soomaalidu ku tilmaamto SHAATI BADALASHO oo ay ula jeedaan in qofka uusan hal meel ku taagnaan oo maalinba meel joogo.

Imaam al bukhaari waxa uu yiri

وقال الإمام البخاري رحمه الله: حَدَّثَنَا عُمَرُ بْنُ حَفْصٍ حَدَّثَنَا أَبِى حَدَّثَنَا الأَعْمَشُ حَدَّثَنَا أَبُو صَالِحٍ عَنْ أَبِى هُرَيْرَةَ -رضى الله عنه– قَالَ: قَالَ النَّبِىُّ -صلى الله عليه وسلم-: «تَجِدُ مِنْ شَرِّ النَّاسِ يَوْمَ الْقِيَامَةِ عِنْدَ الله  ذَا الْوَجْهَيْنِ، الَّذِى يَأْتِى هَؤُلاَءِ بِوَجْهٍ وَهَؤُلاَءِ بِوَجْهٍ». (أخرجه البخارى (كتاب الأدب/باب ما قيل في ذي الوجهين/6058/دار الكتب العلمية)

Abu Hureyra R.C waxa uu ka wariyay rasuulka C.S.W   xadiiskan kore macnihiisuna ah "Kuwa ugu sharta badan maalinta qiyaame waa kuwa labo wajiilaha ah ee qolana waji ugu tago qolana waji kale."

Sidoo kale waxa uu yiri Imaam al Bukhaari raximahullah

وقال الإمام البخاري رحمه الله: حَدَّثَنَا أَبُو نُعَيْمٍ حَدَّثَنَا عَاصِمُ بْنُ مُحَمَّدِ بْنِ زَيْدِ بْنِ عَبْدِ الله بْنِ عُمَرَ عَنْ أَبِيهِ: قَالَ أُنَاسٌ لاِبْنِ عُمَرَ: إِنَّا نَدْخُلُ

عَلَى سُلْطَانِنَا فَنَقُولُ لَهُمْ خِلاَفَ مَا نَتَكَلَّمُ إِذَا خَرَجْنَا مِنْ عِنْدِهِمْ. قَالَ: كُنَّا نَعُدُّهَا نِفَاقًا. (أخرجه البخارى/كتاب الأحكام/باب ما يكره من ثناء السلطان/7178/دار الكتب العلمية)

"Dad baa ibnu cumar ku yiri markaanu booqano madaxdeena waxanu kula hadli jirnay wax khilaafsan waxaanu aaminsanayd markas buu inbu cumar yiri arintaasi waxay agteena ka ahayd NIFAAQ.

Sidoo kale ibnu cumar Allaha ka raali noqdee ka wariyay rasuulku C.S.W inuu yiri

عن ابن عمر -رضي الله عنهما-: عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «مثل المنافق كمثل الشاة العائرة بين الغنمين تعير إلى هذه مرة وإلى هذه مرة» .(أخرجه مسلم /كتاب صفات المنافقين/2784/دار ابن الجوزي).

"Tusaalaha munaafaqu waa sida LAX wareersan oon aqoon kooxda ay raacdo marba mid bay u carartaa"

Imaam ibnu Badhah Raximahullah waxa uu yiri isaga oo ka hadlayo xadiiskan kore

وقال الإمام ابن بطة رحمه الله عقب الحديث: كثر هذا الضرب من الناس في زماننا هذا، لا كثرهم الله، وسلمنا وإياكم من شر المنافقين، وكيد الباغين، ولا جعلنا وإياكم من اللاعبين بالدين، ولا من الذين استهوتهم الشياطين ، فارتدوا ناكصين، وصاروا حائرين. اهـ

Allahu akbar! bal fiiriya waqtigaas uu imaamku ka yaabanaa dadkaas noocas ah maxad maanta u malayn haduu arki lahaa dadka jooga Wallahul muctacaan!

Waxan kusoo gabagabaynaa ATHAR laga wariyay Xudeyfah R.C oo uu ku waaninayay Ibnu mascuud Al-Ansaari uu yiri

وعن أبي مسعود الأنصاري أنه قال لـ حذيفة: أوصني قال: إن الضلالة حق الضلالة أن تعرف ما كنت تنكر، وتنكر ما كنت تعرف، وإياك والتلون في دين الله؛ فإن دين الله واحد. المصدر: شرح كتاب الإبانة من أصول الديانة.

Akhtistoow waxad Allah ka baridaa inuusan qalbigaaga gadin oo maalinba meel aado aadna kala garan waydo xaqa iyo baadhilka ama sida ay kula tahay aa diinta u isticmaasho si waafaqsan hawadaada ama kooxdaada. Waxaynu wada ognahay in Al-ictisaam ay soo mareen heerar kala duwan laga soo bilaabo intii ay iska badaleen magacii la oran jiray Al-ITIXAD haba ugu darnaato waqtigii ciidankii gumaysiga Itoobiya kusoo duuleen Soomaaliya 2006 halkaas oo Allah S.W uu kala saaray dadkii culimada iyo caamada ahaa intaba.

Hadaba goobta aan markaas joogay waa Denmark gaar ahaan magaalada Copenhagen dadku aad bay niyadoodu u kacsanayd waxana ka muuqday qiiro diineed oo qofkasta oo kugu soo qaada dawladii Cabdullahi yuusuf aad ku sigan in lagu gaaleeyo ama ereyo aad u xun aad kasbato.

Waxan xasuusta mar aanu mudaaharaad weyn ka qayb galay oo xitaa caruutii intii la keenay baarlamanka hortiisa lagu gubay calankii Itoobiya iyo sawirkii Cabdullahi yuusuf iyo intii la socotay waliba maalintas waxay ahayd maalin aad u roob badan oo qabow ah laakiinse waxa nagu waynaa xasuuqa loo gaysanayo walaaleheenii joogay caasimada Muqdisho.

Dadkii iigu darnaa ee aan dhibka kala kulmay waxay ahaayeen qolo loo bixiyay GAAS

DHAGOOLE oo aad u taageersanaa Cabdullahi yuusuf iyo ciidankii Itoobiya halkaas oo ay dagaal kaga jireen kana go'een masaajidkii Soomaaliga ahaa ee laga waday ololihii waynaa ee looga soo horjeeday gumaysigii Itoobiya.

Hadaba iyada oo uu xaalku marayo meel adag oo shacabkii walaaleheen ahaa lagu duqaynayo caasimadii Xamar baa waxa magaalada soo booqday nin lagu sheegay inuu ahaa Safiirka Itoobiya u fadhiya wadamada Scandanavia halkas oo uu kula kulmay koox kamid ah dadkii deganaa Copenhagen ee Soomaaliyeed kuwas oo taageersanaa Cabdullahi yuusuf. Waxa dhacday in ragii la kulmay oo tobaneeyo kor u dhaafayo laga helay sawir ay isla sawireen safiirkii itoobiya oo ay ku sheegen inuu Msulim oromo ahaa lakinse wax badan lagama dhagaysan oo salaadii jimcada ayaa lala sugay.

Kadib markii saladi jimcaha aanu tukanay oo dareemaheenuna aad u kacsan yihiin ayaa waxa istaagay nin kamid ahaa Ictisaam halkaas oo uu ka hadalay kulankii dhexmaray safiirkii Itoobiya iyo qoladii taageerada u haysay Cabdullahi yuusuf waxa uuna yiri isagoon la gaban qoladaasi way GAALOOBEEN naaguhuna way ka furan yihiin, lama salaami karo, lamana soo dhawayn karo inteenii badnaydna way u riyaaqeen waxa ragaas ku dhacay walow aniga ahaan aan ka gaabsaday inaan fatwadaad qar iska tuurka ah aan ku raaco ninkaas dhalinyarada ah ee xamaasadu qaaday.

Akhristow meesha ay arintaasi ka dhacayso waxa fadhiya Sheekh Cabdiraxman Abyad oo markas qudbada kasoo degay wax kalimad ahna kama dhihin arinkaas oo waxay u ekayd in uu ka raali ahaa! Waxa dadku wada haysteen sawirkii laga helay ragii la kulmay safiirkii Itoobiya si dadku ugu qancaan in fatwadan wiilka yar ay sax tahay oo aana laga hadli karin!!!

Si kastaba ha ahaatee waxa dhacday in qolo ergo ah masaajidkii loo soo diray si ay bal wax uga waydiiyaan raggan la gaalaysiiyay waxayna la kulmeen Sheekha iyo intii Ictisaam ahayd waxayna ka codsadeen in cudur daar laga bixiyo raggan la gaalaysiiyay oo naagahoodii laga furay oo meelkasta la dhigay sawiradoodii si loo gooyo loona go'doomiyo waxayna arinkii ku dhamaatay fashil oo waxa laga diiday in raggas aan loo cudur daarayn ilaa ay ka tawbad keenaan waxay galeen oo dambi ah.

Aniga ahaan waxan aqaanay dadkii la kulmay safiirkii Itoobiya walow aan aad uga xumaaday inay la kulmaan safiirkaas matalayay ciidankii gumaysiga Itoobiya hadana kuma degdegin gaalaysiintooda ee waan waanin jiray waana la doodi jiray waxna way iga yeeli jireen waxna waanu isku diidi jirtay.

Qolyihii loo yaqaanay GAAS DHAGOOLE waxay markasta ku celcelin jireen dadka maanta ordaya in aysan ka ahayn DIIN ee ay dano kale wataan aniga iyo inta daacada ahna ay nagu awr kacsanayaan oo shaatiga ay qabaan yahay mid dano badan wata waxayna noo bixiyeen DAMEERI DHAAN RAACDAY.

Waxa maalin maalmaha kamid ah dhacday in nin dhalinyaro ah oo taageersan Cabdullahi yuusuf soo galay dukaan halkaas oo dadku ka buuxeen waxa xiligaas joogay nin ka tirsanaa kooxda AL-ictisaam aadna u taageersanaa halgankii lagula jiray gumaysigii Itoobiya, ninkii dhalinyarada ahaa ayaa caytamay kuna qayliyay erayo xun iyo in Itoobiya ay guulaysatay!!! waxa aad u xanaaqay wadaadkii ka tirsanaa Al-ictisaam waxa uuna dharbaaxo kaga soo gooyay

ninki dhalinyarada ahaa oo la yaabay heerka ay wadaadku ka marayso xamaasada arintiina waxa loo xaliyaya si degan oo ay ku dhamaatay.

Akhristoow ma aaminaysaa in wadaadkii maalinkaas dharbaaxay ninkii dhalinyarada ahaa ee xamaasadu ka muuqatay inuu maanta taageersan yahay Dawlada Itoobiya? oo agteeda laga mari karin!!! Soomaalidu waxay dhihi jireen ALLOW CARADDA KORKEEDANA HANAGU CEEBAYN CIIDA HOOSTEEDANA HANAGU CADAABIN.

Waxan aad u qoslaa markaan xasuusto wiilkii dhalinyarada ahaa isaga oo raadinaya ninkii dharbaaxay si uu uga aar guto isaga oo leh Itoobiya ayuu taageeray oo waa in aan dharbaaxaa anigana. وتلك الأيام نداولها بين الناس

La soco qaybta 2-aad inshallah